



SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT

Jaime Alicea, Maamulaha Guud ee Dugsiyada

Xafiiska Maamulaha Guud

Maarso 12, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee SCSD,

Degmo Dugsiyeedka Magaalada Syracuse waxay sii wadaa inay la socoto waxyaabihii ugu danbeeyay ee kasoo kordha cudurka Coronavirus (COVID-19). Caafimaadka iyo badqabka ardaydeena, shaqaalaheena iyo qoysasku waa muhiimadaayada koobaad dhammaan kooxda maamulkuna waxay si feejignaan leh uga shaqaynayeen xaqiijinta inaan diyaar ahaano.

Waqti xaadirka ah, wali ma jiraan dad cudurka laga helay gudaha Degmada Onondaga. Waxaan si joogto ah ula xariiraynaa Onondaga County Health Department (Waaxda Caafimaadka ee Degmada Onondaga), New York State Health Department (NYSDOH, Waaxda Caafimaadka ee Gobalka New York) iyo Center for Disease Control (CDC, Xarunta Ka hortaga iyo Xakamaynta Cudurka) waxaana sii wadaynaa raacista tilmaantooda.

Asbuucan, Gudoomiye Cuomo ayaa ku dhawaaqay in haddii qof ka shaqaynaaya dugsi ama arday dugsi dhigta laga helo cudurka COVID-19 in loo baahan yahay in dugsiga la xiro muddo 24 saac ah. Arintan ayaa u sahlaya khubarada caafimaadka inay baaraan xaalada ayna go'aanshan talaabooyinka xigga. Inta lagu jiro mudadaas horu dhaca ah ee 24 saac ah, waa in la nadiifiyaa dugsiga lana daaweeyaa si waafaqsan tilmaamaha NYSDOH kadibna go'aanka ku aadan goorta dib loo furaayo dugsiga ayaa la gaarayaa markaas kadib. Haddii naloo sheego inaan xidhno dugsi, waxaan kuusoo diraynaa ogaysiiska oon soo marinayno warbaahinta, anagoo adeegsanayna nidaamkeena wicitaanka dugsiga ee School Messenger robo waxaana kusoo qori doonaa xogta oonleenka iyo baraha bulshada.

Agaasimaheena caafimaadka, Agaasimaha Adeegyada Caafimaadka iyo tiro kala duwan oo kalkaalisoooyinka dugsiga ayaa ka qaybgalaaya tababar ay qabanayaan saraakiisha caafimaadka ee maxaliga ah asbuucan. Tababarka waxaa diirada lagu saarayaa jawaabta ay tahay inay qaadaan kalkaalisoooyinka dugsigu haddii arday ama shaqaale la aqoonsado inuu qabo cudurka COVID-19.

Haddii cunugaagu qabo astaamo u eg kuwa hargabka (qandho, qufac, neefta oo ku yaraata) talooyinka ay kusiinayaan saraakiisha caafimaadku waa inaad fadlan guriga ku hayso cunuga. Haddii cunugaagu muujiyo astaamahaan asagoo jooga dugsiga waxa ugu haboon waa in uu u tasgo kalkaalisada dugsiga si loo baaro kadibna kalkaalisada dugsiga ayaa kulasoo xariiraysa.

Waaxda SCSD ee Barashada iyo Waxbarista ayaa ka shaqaynaysay diyaarinta xog tacliineed oo loogu talagalay ardayda haddii aan xirno dhismaha xili uun. Waxaan doonaynaa inaan ardayda iyo qoysaska siino hawalaha tacliineed si ay usii wadaan barashada dhammaan maadooyinka intay guriga joogaan. Hawalaha ayaa qayb ka ah waxbarashada carruurtaadu dhigtaan maalin kasta markay dugsiga joogaan. Waxaa lagu diyaarinayaa heerka fasalka iyo maadadda. Waxaan sidoo kale ka shaqaynaynaa bixinta ikhtiyaarada waxbarashada oonleenka ah qaarkood oon siinayno ardayda iyo qoysaska heli kara khadka internetka. Nashaadaadkaan tacliinta iyo dookhyadaan waxbarashada oonleenka ah waxa alagusoo qori doonaa websetkeena, www.syracusecityschools.com/coronavirus.

Haddii aad leedahay ilmo adeegyo ka hela Special Education Department (Waaxda Waxbarashada Gaarka ah) wuxuu ka faa'iidayan doonaa Kullanka xiga ee cunugaaga ee Committee on Special Education (CSE, Gudigga Waxbarashada

Gaarka ah) si loo qiimeeyo adeegyo kasta oo la gafay iyo saamaynta ay ku reebi karto arintan horumarka cunugaagu haddii aan xirno dugsi. Fasaladeena ardayda dhibaatooyinka caafimaad qaba ay dhigtaan habeenkii ayaa la nadiifiyaa si dhaw ayaana loo muraaqabeeyaa, maadaama aan ognahay in dadka difaacooda jirku liito ay aad ugu nugul yihiin cudurka.

Biloowgii asbuucan, waxaan kuusoo dirnay xog aan kaaga codsanaynay inaad wax ka badasho xogta lagaalasoo xariiraayo haddii aad ogtahay inay isbadashay lagasoo bilaabo biloowga sanad dugsiyeedka. Mar kasta waa muhiim in dugsi cunugaagu haysto xogta ugu danbaysay ee dadka lala xariiraayo marka xaalad degdeg ah timaado taasoo ku qoran faylkaaga.


Degmadu waxay la soconaysaa socdaalka shaqaalaha iyo ardayda ayna ku jiraan horumarinta xirfada shaqaalaha iyo tartanada ciyaaraha iyo tacliinta ee ardayda. Waxaan raacaynaa tilmaanta kasoo baxda NYSDOH waxaana la soconaynaa xaalad kasta. Waan kuusoo sheegaynaa haddii uu jiro socdaal ay tahay inaad ka baaqato. Waxaan dib u eegis ku samanaynaa dhammaan fasaxyada galitaanka dhismaheena iyo adeegsiga dadwaynaha ee xarumaheena.

Fadlan xasuusnoow in cudurka Coronavirus la aaminsan yahay in dadku is qaadsiin karaan lagu kala qaado hawada oo caabuqa sida oo kasoo baxa qof qufacay iyo mid hindhisay oo qaba caabuqa. In gacmaha si wanaagsan loo dhaqo iyo talaabooyinka nadaafada ayaa muhiim u ah ilalainta caafimaadka. Si lamid ah xakamaynta fayrisyada kale, waxaan kugu boorinaynaa inaad cunugaaga kala hadasho talaabooyinka soo socda ee ka hortaga cudurka:

- Si joogto ah u dhaq gacmahaaga, gaar ahaana kadib markaad adeegsato musqusha iyo ka hor u diyaar garoobida ama cunista cuntada. Adigoo adeegsanaaya saabuun iyo biyo kulul, dhaq gacmaha muddo 20 sikin ah. Xaqiiji inaad sidoo kale dhaqdo farahaaga iyo dusha gacmahaaga.
- Ka dheeroow inaad ku qufacdo ama ku hindhsito gacmahaaga ama hawada. Markasta iskuday inaad ku qufacdo ama ku hindhsito tiish, kadibna tiishka ku rid jaqafka qashinka. Haddii aadan haysan kilinikis, ku qufac/hindhis gacantaada.
- Ilaa intaad awoodo, ka dheeroow taabashada indhahaaga, afkaaga, iyo sankaga.

Hadii aad qabto wax su'aalo ah ama walaacyo ah fadlan booqo websetkeena si aad xog dheeraad ah u hesho ama la xariir waaxdeena Health Services Department ood ka helayso 315-435-4145 ama healthservices@scsd.us.

Daacad kuu ah,



Jaime Alicea
Maamulaha Guud ee Dugsiyada